



## WAAYO-ARAGNIMADA WAALIDIINTA SOOMALIDA EE MIDABTAKOORKA

Taxanahaan, [Best Starts for Kids (BSK)] waxay wadaagtay natiijooyinka ra'yi-aruurinta ku saabsan todobo su'aalood oo la xiriiira midabtakoorka ka imaanaya Ra'yi-aruurintii Caafimaadka ee 2019 [BSK], oo ay la socoto falcelimo iyo aaraahda qoysaska kuwaasoo u muraajaceeyay natiijooyinka ra'yi-aruurinta jaaliyaddooda. Kulli 10-ka jaaliyadood ee lagu daray oo ah dadka aan caddaanka ahayn, qoysasku waxay la kulmeen midabtkoor heerar kala duwan leh, qeybkasta oo noolasha ka mid ha, waxayna dheheen qoysasku midabtakoorka siduu u jiro Ra'yi-aruurinta Caafimaadka [BSK] laguma sheegin. Qoysasku waxaa si caadi ah loogu midabtkoorayay meelaha dadweynaha iyo shaqooyinka. Qoysaska jaaliyadaha intooda badan ka socda waxay isku raaceen falalka midabtakoorka inay caadi ka ahaayeen iskoollada ilmahooda, waxayna jaaliyadaha badankoodu sheegeen dhacdooyinka midabtakoorka in ay ka jiraan nidaamka daryeelka caafimaadka. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan natiijooyinka [community café], fadlan ka eeg warbixinta [Community Café Collaborative] oo buuxda (Ingiriis keliya): [<https://bit.ly/3pMbzgf>]

### Waxyaalaha ugu waaweyn ee laga helay, Aragtiyada, iyo Mawduucyada Niqaashka Madasha:

Jaaliyaddaan waxay wajahdaa midabtkoor maalin kasta. Ka-qeybqaatayaal badan waxay sheegeen in lagu xukumo midabka maqaarkooda, dharkooda (oy ku jiraan xijaabka) diintooda, afkooda, iyo lahjaddooda, laakiin inta badan ay dareemaan bahdil ama qiimo-tiris iyo wax aan muuqan. Ka-qeybqaatayaasha waxay u arkeen in dad ka badan intaan ee jaaliyadda Soomaalida ay habbooneyd ra'yi-aruurinta in laga qeybgeliyo si loo helo natiijooyin ka saxsan. Kooxdu waxay sidookale u arkeen in haddii turjumaadda "xaafadda" ee ku jirta dulucda xogta labaad ay ahaan lahayd jaaliyadda Soomaalida ballaaran, tiradu (percentage) in ay ka sarreyn lahayd sidaan.



"Cadaalad-darradaan midabtakoorka waxay horey u socotay kahor inteysan Soomaalidu imaan Mareynka mana fiicnaan. Nidaamka waxaa loo dhisay inuu u faa'iideeyo dad caddaan ah keliya."

– Ka-qeybgale Soomaali ah [Community Café]

"Waxaan dareemaa sida in aanaan cod magalaada ku lahayn codkeenuna macno lahayn."

– Ka-qeybgale Soomaali ah [Community Café]



**27%**

waalidiinta Soomaalida waxay dheheen waan la kulannay midabtkoor.

Waxaa ka mid ahaa waalidiinta Soomaalida kuwaasoo la kulmay midabtkoor:


70% markey helayaan daryeel caafimaad

63% inta la joogay dhaqdhaqaaqyo ilmo

61% inta la joogay iskool ilmo

**57**

waalidiin Soomaali ah baa ka qeybqaatay ra'yi-aruurinta 2019-kii.



Sawirka:  
Fahiima Abdulle & Hanni Hassan